Washington State Department of Social & Health Services

STATE OF WASHINGTON
DEPARTMENT OF SOCIAL AND HEALTH SERVICES
CHILD CARE SUBSIDY PROGRAMS (CCSP)

Warqada Sugitaanka Daryeel bixiyaha Gudaha-Guriga ee Qaraabada / Qoyska, Saaxiibka iyo Deriska ah

Family, Friend and Neighbor (FFN) In-Home / Relative Pending Letter

Taariikhda: _____

_____
LAMBARKA TELEEFOONKA XARUNTA XIRIIRKA ADEEGA MACAMIILKA

_____
LAMBARKA FAAKISKA XARUNTA XIRIIRKA ADEEGA MACMIILKA

_____
LAMBARKA CODSIGA MACAMIILKA

Waxaad ka codsatay Daryeelka Ilmaha Xiriirada Shaqada caawimaad lacag bixin ah oo lagu bixinayo daryeelka ilmaha uu bixiyo mid kamid ah:

1. Qof aan-qaraabo ahayn (saaxiib ama deris) midkaas oo gurigaaga u yimaada si uu ilmaha kuugu xanaaneeyo; ama
2. Qof qaraabo ah u qalma (qoys ah) oo jooga guriga qofka qaraabada ah ama qof u qalma oo qaraabo ah qofkaas oo yimaada gurigaaga si uu u qabto daryeelka ilmaha.

Fadlan akhri kadibna raac tilmaamaha soo socda ee ku qoran Qaybta 1 iyo 2 ee warqadan.

Qaybta 1. Kahor inta aanan la oggolaanin lacag bixinta oona daryeel bixiyaha laga oggolaanin dhinaca Waaxda Carruurta, Dhallinyaarda iyo Qoysaska (DCYF)

Dhammaan daryeel bixiyayaasha qoyska, saaxiibada, deriska ah waxaa **khasab** ku ah in ay da'doodu tahay 18 sanno jir ama ka weyn. Si loo bilaabo hawsha oggolaanshaha, dhammaan daryeel bixiyayaasha qoyska, saaxiibada, iyo deriska ah waxaa khasab ku ah in ay sameeyaan sidaan soo socota:

Tallaabada 1. In ay ka buuxiyaan muuqaalka taariikhdooda mareegtada internetka Goobta daryeel bixiyaha ee WA halkan https://www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/ffn.

Tallaabada 2. In ay ka buuxiyaan muuqaalkooda taariikhdooda mareegtada MERIT halkan del.wa.gov/MERIT.

Tallaabada 3. Marka aad gashid MERIT, buuxi Baaritaanka Asalka Mareegtada (PBC) kadibna qaado tilmaamo ku saabsan sida loo buuxiyo hawsha fara-qaadista. U isticmaal lambarkan codsiga PBC ee **BILAASHKA** ah iyo fara-qaadista: Lambarka Codsiga SU: _____. **Wixii ku saabsan su'aalaha, kala xiriir DCYF lambarkan 1-866-482-4325 Doorashada lambarka8**.

Tallaabada 4. Kusoo dir ama soo geli nuqul la akhrin karo oona ansax ah oo kaarkaaga Dammaanada Bulshada ah iyo sawir aqoonsi ay dowlada kuu soo saartay, sida rukhsad baabuur, aqoonsiga gobolka Washington, ama baasaboor mareegtada Goobta daryeel bixiyaha WA halkan: https://www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/ffn

Tallaabooyinka kale ee dheeraadka ah ee loogu baahanyahay oggolaanshaha daryeel bixiyaha waxay yihiin kuwo kusalaysan xiriirka uu qofku la leeyahay ilmaha iyo halka uu daryeelku ka dhacayo.

Aan-Qaraabo ahayn	**Qaraabo** (qoys xiriir dhiiga ah ka dhaxeeyo, guur ama shahaado maxkamad)
Daryeel bixiyuhu ma ahan qof xiriir la leh ilmaha wuxuuna yahay: a) Saaxiib; ama b) Deriska waalidka.	Daryeel bixiyuhu wuxuu xiriir la leeyahay ilmaha wuxuuna yahay: a) Walaal weyn oo ku nool guri ka baxsan midka ilmaha; b) Ayeeyo ama awoowe (sidoo kale ayeeyayaal iyo awoowayayaal-waaweyn); c) Habaryar ama eedo ama adeer (sidoo kale ayeeyayaal iyo awoowayayaal-waaweyn); ama d) Qofkale oo xiriir dhiig qoys, guur ama shahaado maxkamad ah.
Daryeelka ilmaha waxaa lagu oggolyahay kaliya guriga **Ilmaha** Ma jiraan shuruudo dheeraad ah oo loogu talogalay oggolaansho hore – fiiri **Qaybta 2** wixii ku saabsan shuruudaha ee loogu talogalay u qalmida-soconaysa	Daryeelka ilmaha waxaa lagu oggolyahay guriga **Daryeel** bixiyaha ama guriga **Ilmaha** Haddii uu daryeelku yahay mid ka dhacaya guriga daryeel bixiyaha, daryeel bixiyaha waa in uu ka dhigaa dhammaan dadka da'doodu tahay 16 sanno ama ka weyn, kuwaas oo la nool qofka qaraabada ah in ay buuxiyaan Tallaabada 1, 2, iyo 3 ee kore.

Qaybta 2. Kadib oggolaanshaha ka ahaada DCYF. Lacag bixintu ma bilaabanayso illaa laga gaaro taariikhda daryeel bixiyahaaga la oggolaado ama bilaabo daryeelka, mid kasta oo soo daahda. WAC 110-15-0125

Si aad u ahaatid qof u qalma lacag bixinta, dhammaan daryeel bixiyayaasha aan-ahayn qaraabada (saaxiib iyo deris) iyo qaraabada (qoys) waxaa khasab kugu ah in ay:

A. Ku buuxiyaan, gudaha sagaashanka (90) maalmood ee taariikhda lacag bixintu bilaabato, tababarka Daba-gelida Imaatinka Eliktarooniga DCYF. Ka raadiyaan macluumaadka tababarka halkan https://del.wa.gov/Attendance-support ama uga dhigaan nidaamka daba-gelida imaatinka in laga oggolaado dhinaca DCYF halkan https://del.wa.gov/Attendance-Project.

B. Isticmaalaan maalin walba nidaamka imaatinka eliktarooniga ah si ay u geliyaan wakhtiga ay bilaabaan iyo wakhtiga ay dhammeeyaan daryeelka la siiyo ilmo kasta kadibna usoo gudbiyaan diiwaanada eliktarooniga ah dhinaca DCYF bil kasta ayaga oo isticmaalaya nidaamka eliktarooniga ah.

C. Ka dhigaan macluumaadkooda ku jira mareegtada Goobta daryeel bixiyaha ee WA iyo MERIT kuwo lagu cusboonaysiiyo wax kasta oo isbedel ah oo ku dhaca magacooda sharciyeed, cinwaankooda, ii-maylkooda iyo lambarkooda teleefoonka. **(Qaybta 1:** Tallaabada 1 iyo 2 ee ku qoran bogga koowaad)

D. Ka dhigaan Mareegtada Baaritaankooda Asalka mid la cusboonaysiiyo (waxaa loo baahanyahay 3 sanno kasta). **(Qaybta 1:** Tallaabada 3 ee ku qoran bogga koowaad)

Kuwaan soo socda waa **shuruudaha u qalmitaanka-soconanaya ee dheeraadka ah** ee loogu talogalay daryeel bixiyaasha midaas oo kusalaysan xiriirkooda ay la leeyihiin ilmaha iyo halka uu daryeelku ka dhacayo:

Daryeel bixiyaha **Aan-qaraabada ahayn** Daryeelka ilmaha waxaa lagu **oggolyahay kaliya Guriga Ilmaha**	Daryeel bixiyaasha **Qaraabadaha** ah ee U qalma Daryeelka ilmaha wuxuu ka dhacayaa guriga **Ilmaha** ama **Daryeel bixiyaha**
1. Gudaha 90-ka maalmood ee ugu horeeya ee taariikhda lacag bixintu bilaabato, ay dhammeeyaan: a) Tababarka Ammaanka iyo Caafimaadka ee DCYF ama haystaan xaqiijinta ka reebitaanka tababarka ee DCYF ee ah sida waafaqsan WAC 110-16-0025(2)(b). Tababarka Ammaanka iyo Caafimaadka ee DCYF waxaa si-toos ah internetka looga helayaa halkan: https://www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/ffn; b) Dhammeeyaan tababarka dib-u noolaynta wadnaha (CPR) iyo gar-gaarka koowaad ee qofka weyn, ilmaha, iyo dhallaanka. c) Geliyaan taariikhda ay dhammeeyaan tababarka Dib-u noolaynta Wadnaha/Gar-gaarka Koowaad (CPR) mareegtada MERIT halkan del.wa.gov/MERIT. Kusoo diraan ama soo geliyaan caddeyn ku saabsan tababarka Dib-u noolaynta Wadnaha/Gar-gaarka Koowaad (CPR) (kaarka, shahaadada, ama warqada macalinka) dhinaca mareegtada DCYF halkan https://www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/ffn 2. Gudaha 45 maalmood oo laga joogo marka ay dhammeeyaan tababarka kor lagu sheegay, siiyaan dhinaca DCYF WCCC Heshiiska Ammaanka iyo Caafimaadka Gudaha-Guriga ah midkaas oo laga sixiixay dhinaca daryeel bixiyaha iyo adiga, waalidka(waalidiinta) midkaas oo sheegaya in ay kawada hadleen oona muraajaco kusameeyeen dhammaan waxyaabaha ku qoran heshiiska ee ah mowduucyada iyo arinta. 3. Kaqayb qaataan booqashada sannadlaha ah ee ah guriga ilmaha midaas oo uu sameeyo Takhasuslaha Ka baxsan Rukhsada DCYF; iyo, marka la heli karo, adiga, waalidka ah. Ujeeddada booqashadu waxay tahay in la hubsado in adiga iyo daryeel bixiyaha aad u hoggaansantihiin shuruudaha ammaanka iyo caafimaadka, lala socodo deegaanka daryeelka ilmaha iyo xiriirada daryeel bixiyaha uu la leeyahay ilmaha, loogana hadlo samaynta arimaha ammaanka iyo caafimaadka ah. 4. U dhammeeyaan tababarka Ammaanka iyo Caafimaadka ay DCYF oggolaatay ugu yaraan si sannadle ah.	1. Marka uu ka dhacayo daryeelka ilmaha gudaha guriga daryeel bixiyaha qaraabada ah, dadka da'doodu tahay 16 sanno ama ka weyn kuwaas: a) Oo la nool daryeel bixiyaha qaraabada ah waxaa khasab ku ah in ay ka dhigaan Baaritaankooda Asalka La qaadi karo mid la cusboonaysiiyo (loo baahanyahay 3 sanno kasta). b) Oo u qorshaysanaya in ay la noolaadaan daryeel bixiyaha qaraabada ah, waxaa khasab ku ah in ay ka dhigaan Baaritaankooda Asalka La qaadi karo mid la sameeyo kahor inta aysan ugu soo wareegin guriga daryeel bixiyaha. 2. Kaqayb galaan wicitaanka teleefoonka caawimaada farsamada gudaha sagaashan maalmood oo laga joogo taariikhda ay lacag bixintu bilaabato iyo sannad kasta kadib wicitaanka teleefoonka koowaad. Shuruudaan kaliya waxay khuseysaa daryeelbixiyaha qaraabada ah midkaas **oo aan ahayn**: a) Walaal weyn midkaas oo ku nool meel ka baxsan guriga ilmaha; b) Ayeeyo ama awoowe ama ayeeyayaal iyo awoowayayaal-waaweyn; c) Habaryar ama eedo ama adeer ama abti.

Oggaanshaha Daryeelka Ilmaha (Child Care Aware) waxay bilaash ku siisaa, macluumaad iyo wareejin aan eex-lahayn qoysaska raadinaya daryeel ilmo rukhsadaysan oo leh tayo-saraysa. Wac 1-800-446-1114 ama toos internetka uga gal halkan http://wa.childcareaware.org.

Si aad u heshid xaaladaha baaritaanka asalka daryeelka ilmaha rukhsadaysan, taariikhda rukhsada, warbixinada ilaalinta, luuqadaha lagu hadlo iyo wax kale oo baddan, waxaad ka gashaa: **Baaritaanka Daryeelka Ilmaha halkan www.del.wa.gov/check.**

Waxaad oggaan kartaa haddii ilmahaaga ama koritaanka ilmaha uu yahay mid wanaagsan ama haddii ay ayadu u baahantahay tababar yar oo dheeraad ah si ay diyaar ugu noqoto iskuulka. Si aad sidaan u samaysid, waxaad buuxin kartaa su'aalaha baaritaanka koritaanka ilmaha bilaashka ah adiga oo kasoo waca Khadka Marwalba Shaqeeya ee Caafimaadka Qoyska lambarkan 1-800-322-2588 ama gala bogga internetka Caawimaada Waalidka 123 http://www.parenthelp123.org/child-development/help-me-grow-washington si aad u oggaatid wax baddan oo arintaasi ku saabsan.

Carruurtu waxay haystaan xaqa aadanaha ee aasaasiga ah ee ah in ay ammaan helaan. Hanjabaad xad gudub iyo dayicaad ah ee loo gaysto ammaanka ilmaha midaas oo gelinaysa khatar dhaawacyo jireed iyo dareen ah iyo xitaa dhimmasho. Haddii aad kashakisid in ilmaha uu yahay dhibane xad gudub ama dayicaad, kasoo wac DSHS teleefoonkeeda lacag la'aanta ah lambarkan 1-866-END-HARM (1-866-363-4276).

Fadlan kasoo wac Xarunta Xiriirka Adeega Macamiilka haddii aad qabtid wax su'aalooyin ah oo ku saabsan tallaabooyinka xiga ama u qalmitaankaaga-soconaya lambarkan 1-877-501-2233.

Haddii uu daryeel bixiyahaagu qabo su'aalooyin ku saabsan hawsha oggolaanshaha iyo shuruudaha u sheeg in ay la xariiraan takhasaslahooda ka reeban rukhsada halkan: 1-866-482-4325 lambarka8 ama ii-mayl u dir dhinaca dcyf.ffn@dcyf.wa.gov.